



Qaybinta Dawooyinka Marka Ay Jirto Xaalad Degdeg ah

Kaydka Qaran ee Istarataajiga ah (Strategic National Stockpile) waa barnaamij ay leedahay dawladda federalku oo gobollada siiya dawooyin iyo alaab caafimaad marka lagu jiro xaalad degdeg ah.

Marka gargaar dhakhso ah loo baahan yahay

Marka cudur dilaaco ama faafo, marka weerar argagixiso oo biyoolooji ah ama masiibo dabiici ah ka dhacdo Gobolka Washington, kumanaan qof--suurtogal ahaan malaayin qof--ayaa u baahan kara gargaar caafimaad si loo daweeyo ama looga hortago fidista cudurka. Kaydka alaabta caafimaadka iyo dawooyinka ee degmada si dhakhso ah ayaa loo dhammeyn doonaa marka ay jirto xaalad caafimaad dadweyne oo degdeg ah.

Kaydka Qaran ee Istarataajiga ah (Strategic National Stockpile) (SNS) waxa uu gargaar ka geystaa in la haqabtiro baahida kayd dheeraad ah iyada oo dhakhso gobollada weydiista loo siinayo tiro balaadhan oo ah dawooyinka iyo alaabta caafimaadka ee muhiimka ah ee xilliga degdegga.

Gargaar la siinayo Washington iyo beeshaada ama xaafaddaada

Marka ay dhacdo masiibo, faafid ama weerar, Gudoomiyaheena ayaa dawladda federalka weydiisan doona in shixnado ah SNS loo soo diro Gobolka Washington. Marka gargaarka la oggolaado, waxay SNS codsiga ka bixin doontaa goobo kayd oo qorsheysan oo ku yaalaa meelo wadanka ku baaxsan. Alaabta waxa loo geyn karaa gobol kasta gudaha 12 saacadood ka dib codsiga.

Iyada oo ku xidhan nooca xaaladda degdegga, waxay SNS keeni doontaa antibiyootig, antibodhiyo ah kiimiko (chemical antidotes), lidka sunta (antitoxins) ama alaab caafimaad ama qalitaan oo kale. Dawooyin dheeraad ah iyo/ama alaab caafimaad ayaa la bixin karaa gudaha 24 ilaa 36 saacadood ee ku xiga.

Marka la helo shixnadaha SNS, shaqaalaha ka jawaabista degdegga ee Gobolka Washington ayaa dhakhso alaabta iyo dawooyinka toos u siin doona beelaha ama komyuunitiyada u baahan.

Sida loo helo dawooyin marka ay jirto xaalad degdeg ah

- Magaalooyinka ku yaala Gobolka Washington waxay sameyn doonaan xarumaha dawooyinka degdegga (oo sidoo kale loo yaqaano goobaha bixinta -- [points of dispensing sites] ama PODS) halkaasoo dadku ka soo qaadan karaan dawooyinka degdegga ama lagu siin karo tallaalo. Xarumaha daweyntu waxay ku ooli doonaan dhismeyasha waaweyn ee dadweynaha sida dugsiyada, goobaha ciyaaraha ama kiniisadaha ku yaala dhawr aag si loo yareeyo

wakhtiga ay dadka ku qaadato inay mid kasta u safraan. Hay'adaha caafimaadka dadweynaha ee degmada ayaa sheegi doona goorta ay xarumaha daweyntu furmi doonaan, halka laga heli karo, sida loo tagi karo, waxa la soo qaadanayo iyo waxa la filan karo. Waxa aad awoodi doontaa inaad macluumaadkan muhiimka ah ka heshid illaha ay ka mid yihiin:

- Warka telefishanka iyo raadyaha; wargeysyada ama jaraa'idka.
- Bogoga internetka ama Webka ee maamulista caafimaadka dadweynaha iyo degdegga ee heer gobol iyo heer degmo.
- Ururada beelaha ama komyuunitiyada ah madani ama kuwo diineed.

Dawladda degmooyinka ayaa mas'uul ka ah in la go'aamiyo goobaha ay ku ooli doonaan xarumaha daweynta ee aagooda. Marrar badan goobahaas lama baahin doona ama lama sheegi doono ilaa xaalad degdeg ah ka dhacdo. Xarun daweyn kasta looma isticmaali doono xaalad degdeg oo kasta, sidaa daraadeed waxa muhiim noqon doonta in illaha kor ku qoran laga fiiriyo macluumaad hadda ah marka ay dhacdo xaalad degdeg ah.

Marka la joogo xarunta daweynta

- Haddii xarumaha daweynta loo furo in lagu qaybiyo dawooyin ka yimid SNS marka ay jirto xaalad degdeg ah, wax kharash ah lama saari doono dadweynaha.
- Shaqaale tababaran ayaa la heli doonaa si ay kuu gargaaraan marka aad joogtid xarunta daweynta.
- Habraacu waxa uu noqon doonaa mid fudud.
- Iyada oo ku xidhan nooca xaaladda degdegga, waxa laga yaabaa in hal qof uu awoodi karo inuu dawooyinka u soo qaado qoys ama koox.
- Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, waxa aad macluumaad hadda ah ka fiirin kartaa illaha kor lagu qoray.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-028
Somali